Region Örebro län — UPPSALA UNIVERSITET — VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET

# Weydiisashada ka qaybgalka daraasad cilmiyeed kuna saabsan gudbinta Metformin ee dhinaca caanaha naasaha iyo dhiiga dhinaca carruurta la naas-nuujiyo – Daraasad u kuur-gal lehna kaydin shay baar oo ah caanaha naasaha iyo dhiigga kana dhacaysa Gobolka Västra Götaland iyo Gobolka Örebro

Waxaa halkan lagugu weydiisanayaa inaad ka qaybgasho daraasad cilmiyeed ku saabsan daryeelka dawada Metformin ee xilliga naas-nuujinta iyo haddii aad noo oggoshahay shay-baaryadaada loo kaydiyo cilmi-baarisyo mustaqbalka ah. Dukumentigan waxaad ku helaysaa warbixin ku saabsan daraasaddan iyo waxa ay tahay in laga qaybgalo. Adigu ma ka qaybgeli kartid daraasadan ilaa iyo ay ugu horeyn ay lix toddobaad ka soo wareegto ka dib ummulidda oo waa in aad soo qaadatay Metformin bilaa isbaddalo tirada dawo ah ugu yaraan laba toddobaad.

**Muxuu mashruucan ku saabsan yahay oo sababtee ayaad u rabtaan inaan ka qaybgalo?**
Waxaa lagu weydiisanayaa inaad ka qaybgasho daraasadan maadaama aad qaadato Metformin isla markaasna aad naas-nuujiso. Metformin waa dawo ansax ka ah Iswiidhan iyo dalal kale oo badan oo waxaa loo isticmaalaa daweynta xanuunka macaanka nooca 2. Dhakhtarkaaga ayaa kuu qoray dawadan sababtoo ah faa’iidooyinka daweyntan ayaa ka weyn khataraha. Laakiinse waxaa loo baahanyahay macluumaad dheeraad ah kuna saabsan heerka ay dawadan ugu gudubto caanaha naasaha.

Ujeeddada daraasadan waa in la cabbiro gudbinta dawadan Metformin ee caanaha naasaha iyo intee in leeg oo dawadan ah ayaa ka dib ku jirta wareega dhiiga ee ilmaha ka dib naas-nuujinta. Gudaha Iswiidhan 30 haween ah ayaa la qori doonaa daraasaddan. Natiijada daraasaddan waxaa la soo bandhigayaa iyadoo heer koox ahaan ah dhinaca joornaalada cilmiga, iyadoo aan daboolka laga qaadayn shakhsiyadda ka qaybgalayaasha daraasaddan. Daraasadan waxay nus daraasadeed ka tahay mashruuca ConcePTION. ConcePTION waa mashruuc cilmi-baaris guud oo barayfad ah, waxaa maal-galisay Innovative Medicines Initiative (https://imi-conception.eu), ujeeddaduna tahay in la kordhiyo aqoonta ku saabsan dawadan la qaato xilliga uurka iyo naas-nuujinta. Madaxa cilmi baarista ee daraasadda waa Jaamacadda Uppsala. Madaxa cilmi-baarista ayaa tixraacaya hay'adda mashruucan qaabilsan. Dhinacyada wada-shaqaynta la leh waa Isbitaal Jaamacadeedka Örebro iyo Isbitaalka Östra Sjukhuset ee Göteborg. Daraasaddan waxaa baartay oo ansaxisay Hey’adda dawladda ee eegista anshaxa, (diiwaan lambar 2023-02549-01).

Haddii aad rabto inaad ka qayb gasho daraasadda, fadlan la xiriir dhakhtarkaaga jooga rugta takhasuska daryeelka hooyada ee Göteborg, amaba Örebro, ama cilmi-baaraha mas’uulka ah lagana helayo macluumaadka xiriirka ee hoos ku xusan. Ka hor inta aadan ka qeybgelin waxaa loo baahanyahay oggolaanshahaaga. Si aad uga qeybqaato daraasadan waxaa loo baahan yahay xitaa oggolaanshaha ka qaybqaadasho ee ilmaha in laga helo dhammaan kuwa haysta mas’uuliyadda sharci ee ilmaha.

**Waa maxay micnaha in laga qaybqaato daraasaddan?**

Haddii aad go'aansato in aad daraasaddan ka qeyb-qaadato, waxay micnaheedu tahay in aad dhiibayso samballada caanaha naasaha iyo shay baaryada dhiiga iyo in aannu shay baar dhiig ka qaadayno ilmahaaga. Waxaad xitaa buuxin doontaa foom warsasho ah. Dhammaan shay baaryada waxaa la qaadayaa wakhti isku mid ah xilliga hal booqasho oo ka dhacaysa rugta takhasuska daryeelka hooyada. Waxaa lagugu casuumi doonaa wax aad cunto ka dibna waxaad dhiibi doontaa shay baaryadaada ugu horeeya ka hor inta aanad qaadan dawadaada Metformin. Waxaad ilmahaaga naas nuujin doontaa wakhti yar ka hor inta aanad qaadan dawadaada waxaana lala xiriirin doonaa in sambalka caanaha naasaha ee labaad la qaadi doono. Haddii aad u baahato in aad dhowr jeer naas nuujiso inta booqashadaas lagu jiro waa caadi. Booqashadan waxaa la xisaabiyay inay qaadanayso qiyaastii afar saacadood.

*Samballada caanaha naasaha*
Waxaad dhiibi doontaa samballada caanaha naasaha laba wakhti. Shay baarka ugu horeeya waxaa la qaadayaa ka hor inta aanad qaadan dawadaada Metformin ka dibna waxaa la qaadi doonaa sambalka caanaha naasaha laba saacadood ka dib marka aad qaadatay dawadan. Samballada caanaha naasaha adiga ayaa keligaa iska qaadaya iyadoo aad adeegsanayso qalabka soo nuugista caanaha naasaha oo elaktaroonig ah kaas oo annaga aad naga helayso. Marka aad qaadayso sambalkan waxaad naasahaaga ka faaruqinaysaa dhammaan caanaha, ilaa iyo aad dareemayso inay maranyihiin. Isu geyn 40 mililitir oo caanaha naasaha ah ayaa la ururinayaa.

*Shay baaryada dhiigga*
Waxaad shay baaryo dhiig dhiibi doontaa laba wakhti. Shay baarka ugu horeeya waxaa la qaadayaa ka hor inta aanad qaadan dawadaada Metformin ka dibna waxaa la qaadayaa shay baar dhiig laba saacadood ka dib marka aad qaadatay dawadan. Isu geyn 28 mililitir oo dhiig ah ayaa la ururinayaa.

*Shay baarka dhiig ee laga qaadayo ilmahaaga*
Waxaanu xitaa shay baar dhiig ka qaadi doonaa ilmahaaga. Taas waxaa loo samaynayaa si loo eego inta ay leegtahay dawada Metformin ee ku jirta wareega dhiiga ee ilmaha ka dib naas nuujinta. Shay baarka waxaa la qaadayaa afar saacadood ka dib marka aad qaadatay dawadaada Metformin. Isu geyn 0,8 mililitir oo dhiig ah ayaa laga ururinayaa ilmaha. Shay baarka ilmaha wuxuu u dhacayaa si waafaqsan nidaamka caafimaadka oo wadata khafiifin xanuun ahna nooca sonkor la qasay iyo haddii loo baahdo xanuun yarayn meesha la durayo ah (Emla).

*Foomka warsashada*
Daraasaddan waxaan ku ururin doonaa kuna diiwaan-gelin doonaa macluumaad ku saabsan adiga, caafimaadkaaga, ilmahaaga iyo dawooyinkaaga iyadoo loo marayo foom warsasho kaas oo aad buuxinaysso inta lagu jiro booqashadan. Marka aad dhiibto sambalkaaga labaad ee caanaha naasaha ayaad xitaa buuxin doontaa foom warsasho oo labaad oo kooban oo khuseeya nidaamka qaadista shay baarka. Shaqaalaha qaadista shay baarka ayaa xitaa

diiwaangelin doona warbixin khuseysa nidaamka qaadista dhiigga ee adiga iyo ilmahaaga. Macluumaadkan waxaa loogu baahan yahay si loo darso shay baaryadaada.

Waxaad heleysaa tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan qaadisata shay baaryada haddii aad doorato inaad ka qeyb gasho daraasaddan. Shay baaryadan waxaa loo kaydin doonaa si maxali ah ka dibna waxaa loo dirayaa Kaydka shay baarka ee Uppsala marka dhammaan shay baaryada daraasaddan la ururiyo.

**Wixii faa'iidooyin ama khataro ah ee jiri kara in laga qaybgalo daraasaddan**
Ma la filayo in adigu aad faa'iido toos ah ka helayso daraasaddan. Laakiinse natiijada daraasaddan waxay kaalmayn doontaa warbixin taas oo xilliga mustaqbalka caawin karta haweenka naas nuujiya inay gaaraan go'aan si fiican u salaysan kuna saabsan in la isticmaalo Metformin xilliga naas nuujinta. Warbixinta noocaas ah waxay xitaa shaqaalaha daryeelka caafimaadka ka caawin doontaa in talo ku salaysan xaqiiq la siiyo haweenka naas nuujinaya kuna saabsan isticmaalka Metformin.

Daraasaddan sinnaba wax ma uga baddalayso daweyntaada, sidaas darteed ka qaybgalka ma jiraan wax khataro ah oo kaaga imanaya adiga. Xilliga qaadista dhiigga waxaa caadi ahaan qofku dareemaa duris fudud. Qofka wuxuu yeelan karaa calaamad khafiif ah oo mar walba waxaa jirta khatar yar oo ah waxyeelooyin neerfayaasha ah, taas oo cabbir ahaan ah sidii xanuun ama kabuubyo. Xilliga qaadista shay baarka dhigga waxaa la ururin doonaa isu geyn 28 milili tir oo dhiig ah laba wakhti. Taas waxaa la barbar-dhigi karaa 450 mililitir oo dhiig ah in la qaado xilliga dhiig bixin caadi ah.

**Maxaa ku dhacaya macluumaadkayga?**
Xilliga daraasaddan ayaa macluumaadka caafimaad ee ku saabsan adiga iyo ilmahaaga la ururin doonaa oo la kaydin doonaa. Macluumaadka caafimaad ee shakhsiyan ee la diiwaan-geliyay kuguna saabsan waxaa keliya oo loo isticmaali doonaa si waafaqsan sharraxaadda dhanka ujeeddada daraasaddan. Dhammaan macluumaadka kugu saabsan waxaa loo maarayn doonaa si waafaqsan Sharciga ilaalinta macluumaadka (GDPR 2016/679) loona hayn doonaa si ah in dadka aan shaqo ku lahayn aanay u heli karin. Marka aad ka mid noqoto daraasaddan waxaa laguu qoondeynayaa lambar sir ah oo daraasaddan ah. Macluumaadka aad dhiibto waxaa lagu calaamadin doonaa lambarka sirta ah oo ka dib loo isticmaali doonaa daraasadayn aan lahayn magacaaga, lambarkaaga shakhsiga ama macluumaad kale oo si toos ah aan la lahayn xiriir adiga. Furaha lambarka sirta ah waxaa la kaydinayaa isaga oo gooni ka ah warbixinta caafimaadka isagoo yaala kayd macluumaad oo amaan ah dhinaca Jaamacadda Uppsala. Macluumaadkaaga caafimaad waxaa lagu kaydin doonaa gudaha *RedCap*, taas oo ah qalab elaktaroonig ah looguna talogalay ururinta macluumaadka ee laga isticmaalo Jaamacadda Uppsala. Mas'uuliyiinta daraasadda waxaa dheer in shaqaalaha daraasadda ee xaqa u leh ee jooga UDOPP (Maxadka farmasiyada, Jaamacadda Uppsala) ay heli doonaan macluumaadka warbixinta caafimaadkaaga ee loo baahanyahay xilliga daraasadaynta shay baaryada, laakiinse macluumaadkan waxaa loo dhiibi doonaa qaab ah in aan lala xiriirin karin adiga shakhsi ahaan. Haddii aanad oggolaan in macluumaadkaaga loo kaydiyo cilmi-baarisyo

mustaqbalka ah waxaa la kaydin doonaa tobban sano ka dib marka daraasaddan la dhammeeyo intaas ka dibna waa la baa'biinayaa. Macluumaadkaaga xiriirka way dhici kartaa in lagu kaydiyo Jaamacadda Uppsala si aanu u awoodno inaanu kula soo xiriirno oo loo qorsheeyo qaadista shay baaryada. Macluumaadka xiriirka waa la masaxi doonaa marka dhammaan warbixinaha iyo shay baaryada la ururiyo.

Kaydka shay baaryada wuxuu kaydin doonaa macluumaadka shay baarka ee la xiriirta lambarka shakhsiga si loo awoodo in loo soo saaro shay baaryada la daraasadaynayo. Macluumaadka waxaa lagu kaydin doonaa kaydyada macluumaadka ee Gobolka Västra Götaland, Gobolka Örebro län iyo Gobolka Uppsala.

Jaamacadda Uppsala ayaa mas'uul ka ah macluumaadkaaga shakhsiga ah. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato nooca macluumaadka la diiwaan-geliyay ee kugu saabsan iyo haddii loo baahdo in la saxo wixii khalad ah ee jiri kara. Waxaad xitaa codsan kartaa in macluumaadkaaga la masaxo ama la xadeeyo isticmaalka macluumaadkaaga. Laakiinse xaqa masaxaada iyo xadeynta maareynta macluumaadkaaga shakhsi ma khuseyso marka macluumaadkaas ay lagama maarmaan u yihiin cilmi-baarista socota. Haddii aad rabtid helista macluumaad, fadlan la xiriir cilmi-baaraha mas'uulka ka ah daraasaddan (fiiri macluumaadka lagala xiriirayo ee hoos ku qoran). Haddii aad aragtiyo ka qabto ama aanad ku qanacsanayn sida macluumaadkaaga shakhsiga ah loo maaraynayo waxaad la xiriiri kartaa wakiilka ilaalinta macluumaadka ee Jaamacadda Uppsala (dataskyddsombud@uu.se) ama Hey'adda dawladeed ee ilaalinta shakhsiga, https://www.imy.se, taas oo ah hey'adda dawladeed ee ka warhaynta.

**Maxaa ku dhici doona shay baaryada la iga qaaday?**
Shay baaryada dhiigga iyo caanaha naasaha ee la ururiyay iyo macluumaadka wakhtiyada la qaaday shay baaryada iyo maaraynta shay baaryadaas waxaa loo diri doonaa oo lagu kaydinayaa Kaydka shay baaryada Uppsala ee ku yaal Uppsala, Iswiidhan (diiwaan-gelin lambar 827 dhanka Hey'adda kormeerka daryeelka caafimaadka iyo xanaanada). Hogaanka (mas'uulka) kaydka shay baaryada waa Gobolka Uppsala. Heerarka Meetformin ee ku jira dhiigga iyo caanaha naasaha waxaa lagu daraasadaynayaa UDOPP (Maxadka farmasiyada, Jaamacadda Uppsala).

Haddii aad oggolaato in shay baaryadaada loo kaydiyo cilmi-baarisyada mustaqbalka waxaa laga dhigayaa in kuwaas la heli karo dhinaca ujeedooyinka cilmi-baarisyada dawo ee loo arko inay fa'iido u leeyihiin bulshada. Xilliga maanta lagu jiro maaha suurtagal in la ogaado nooca ay ujeedooyinkaas gaarka ah noqon doonaan. Shay baaryadaas waxa la oggolyahay in keliyaato loo isticmaalo qaabka aad adigu oggolaatay. Haddii ay dhacdaba inay soo baxdo cilmi-baaris dheeraad ah oo aan weli la qorsheyn markaas guddida eegista anshaxa ayaa go'aamin doonta haddii shay baaryadaas la isticmaali karo iyo haddii loo baahdo in lagula soo xiriiro mar kale lagu weydiisto oggolaansho cusub. Haddii aanad oggolaan in shay baaryadaas loo kaydiyo cilmi-baarisyo mustaqbalka ah markaas waxaa la kaydin doonaa tobban sano ka dibna waa la baa'biinayaa.

Waxaad xaq u leedahay in aad diido in la kaydiyo shay baaryadaas. Haddii aad oggolaato in la kaydiyo shay baaryadaas waxaad xaq u leedahay in wakhti dambe aad dib ula soo noqoto oggolaanshahaas (ka noqosho). Markaas shay baaryadaada waa la baa'biinayaa ama laga dhigayaa kuwo aan la aqoonsan karin qofka iska leh. Shay baar waxa keliyaato oo in la aqoonsado qofka iska leh laga dhigayaa haddii aanay suurtagal ahayn in la baa'biiyo iyadoo shay baaryada kale aanay ku baa'bayn. Haddii aad rabto inaad dib ula soo noqoto oggolaanshahaaga, la xiriir cilmi-baaraha mas'uulka ka ah daraasaddan, fiiri macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

**Sidee ayaan u helayaa warbixinta ku saabsan natiijada daraasaddan?**
Ma heli doonti wax ah natiijooyin gaar kuu ah lagana helay daraasadaynta shay baaryadaada. Natiijada waxaa lagu daabici doonaa joornaalada cilmiga. Marka taas dhacdo waxaa wargelinteeda lagu qori doonaa boggayaga intarnatka (https://imi-conception.eu).

**Caymis iyo gunno lacag ah**
Adiga oo ah ka qaybqaate daraasad waxaa ku khuseeya caymiska waxyeelada bukaan socotada ee caadiga ah iyo caymiska dawada. Caanaha la soo lisay ee aanu isticmaalnay waad haysan kartaa. Waxaad heli doontaa gunno lacag ah looguna talogalay wixii ah safaro aad ugu timi qaadista shay baaryada kagana tagtay. Waxaad xitaa heli doontaa gunno dhaqaale looguna talogalay dhiibista dhiigga iyo caanaha naasaha oo ah 1000 karoon. Gunnadaas waa mid xor ka ah cashuur.

**Ka qaybqaadashada waa mid qofku xor u yahay**
Ka qaybqaadashadaada daraasaddan waa mid aad xor u tahay. Adigu xilli kasta oo aad rabto ayaad dooran kartaa in aad dib ula noqoto oggolaanshahaaga iyo joojinta ka qaybgalka. Haddii aad doorato inaad joojiso ka qaybgalkaaga ma u baahnid inaad sheegto wax sharraxaad ah oo taas xitaa wax raad ah ma ku yeelan doonto daryeelkaaga caafimaad iyo daweyntaada mustaqbalka. Haddii aad go'aansato inaad dib uga noqoto ka qaybgalkaaga waxaad codsan kartaa in macluumaadka ku saabsan adiga iyo caafimaadkaaga la masaxo, waa haddii macluumaadkaas aan horey loo daraasadayn ama loo isticmaalin daabacaadaha cilmiga ah. Haddii aad rabto inaad joojiso ka qaybgalkaaga, fadlan la xiriir mas'uulka daraasaddan, fiiri macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

## Macluumaadka xiriirka

Cilmi-baaraha mas'uulka ka ah daraasaddan waa Mats Hansson, barafasoor sare dhinaca anshaxa dawooyinka.

**Mats G. Hansson**
Barafasoor sare dhinaca anshaxa dawooyinka
Xarunta cilmi-baarista iyo anshaxa bayoolajiga (CRB) ee maxadka cilmiga caafimaadka dadweynaha iyo
Jaamacadda Uppsala

Telafoon: 0763-412050
Ii-mayl: mats.hansson@crb.uu.se
www.crb.uu.se

*Kalkaaliye cilmi-baaris:*
**Erica Sundell**
Xarunta cilmi-baarista iyo anshaxa bayoolajiga (CRB) ee Jaamacadda Uppsala

Telafoon: 0734-697460
Ii-mayl: erica.sundell@crb.uu.se

Cinwaan:
Uppsala Universitet
Box 564
751 22Uppsala

## Macluumaadka xiriirka ee shuraakada wada shaqayn ee dhinaca Örebro iyo Göteborg

**Helena Backman**
Dhakhtar sare, bare

Tel: 072-7121258
Ii-mayl: helena.backman@regionorebrolan.se.

**Cecilia Jinghede-Nordvall**
Ummuliso cilmi-baariseed

Tel: 0790990263
Ii-mayl: cecilia.jinghede-nordvall@regionorebrolan.se

Takhasuska uurka iyo
Universitetssjukhuset
701 85 Örebro

**Linda Englund-Ögge**
Dhakhtar sare

Telafoon: 031-343 41 74
Ii-mayl: linda.englund-ogge@vgregion.se

Qaybta takhasuska uurka
Sahlgrenska Universitetssjukhuset/Östra

416 85 Göteborg

**Jenny Andersson**
Kalkaaliyaha kalkaaliyaha caafimaadka
Ii-mayl: jenny.ma.andersson@vgregion.se

Qaybta takhasuska uurka
Sahlgrenska Universitetssjukhuset/Östra
416 85 Göteborg